



Federal Republic of Somalia  
Ministry of Interior and Federal Affairs

Cadaado, 20 ka May 2016

**WAR-MURTIYEEED**

Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka, Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee Dowlad Goboleedyada, iyo Maamullada dhismaya (Banaadir, Hiiraan iyo Shabeellaha Dhexe) waxay si weyn ugu faraxsan yihiiin, in si habboon uu u qabsoomay Kulan Wadatashi ah oo ku saabsanaa Qorshe Howleedka Dowladaha Hoose (Wadajir). Kulan Howledkaan ayaa ahaa kii seddexaad ee noociisa ah lagu qabtay magaalada Cadaado intii u dhexaysay 16 - 19 May, 2016.

Shirku wuxuu si gaar ah ugu mahad celinayaas Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Dowladaha Hoose ee Dowlad Goboleedka Galmudug oo marti gelisay shirka. Sidoo kale wuxuu bogaadinayaas kasoo qayb galga dhammaan wufuudda kala duwan ee shirka yimid.

Kulankan oo socday muddo afar maal mood ah waxaa ka soo baxay qodobada hoos ku qoran:

1. Waxaa la sameeyay gole ka kooban toddoba xubnood oo kala ah: Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka, Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee Dowlad Goboleedyada iyo Maamullada Dhismaya.
2. Goluhu in uu noqdo madal ay ku wada tashadaan kuna lafaguraan horumarka iyo shaqooyinka ay wadaagaan hay'adaha sare ku xusan.
3. Goluhu wuxuu mas'uul ka yahay qorshaynta, hoggaaminta iyo kormeerka hanaanka wadajir.
4. Waxaa la qeexay laguna heshiiyay Waajibaadka iyo mas'uuliyadaha madasha.
5. Waxaa lagu heshiiyay In Dowlad-Goboleedyada ay mas'uul ka yihiiin Sameyntha Dowladaha hoose.
6. Wuxuu la qeexay laguna heshiiyay marka xasilinta la samaynayo in degmooyinka la isku raaciyo sida ay isugu dhow yihiiin (Clustering approach).
7. Waxaa lagu heshiiyey in la xoojiyo xiriirkha Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka iyo Wasaaradaha Arrimaha Gudaha ee Dowlad Goboleedyada iyo Maamullada dhismaya (Banaadir, Hiiraan iyo Shabeellaha Dhexe).
8. Wasaaradda Arimaha Gudaha iyo Federaalka waa in ay xil iska saartaa sidii dhaqaale loogu heli lahaa Hannaanka Wadajir ee Dawladaha Hoose.
9. Waxaa lagu heshiiyey in barnaamijka Wadajir uu noqdo hannaanka loo adeegsanayo dibuheshiisiinta, wada hadalka bulshada, mashaariicda bulshada iyo dhismaha goleyaasha deeganka.
10. Buugga Hannaanka Wadajir waxa la marsiiyay akhrinta ugu dambaysay, si wadajir ah ayaana loo ansixiyay.

DHAMAAD